

Jaantuska xogta ee barnaamijka ilaalinta

CSO-yada ee Tigray / Itoobiya

FAHAN:

Shaqaale CSO oo lab ah ayaa si aan habbooneyn u taabtay dumarka iyo gabdhaha inta lagu guda jiro qeybinta gargaarka.

Barnaamijka amaanka waxa ay ujeedda-diiisu tahay in la hubiyo inta suurtogalka ah in xubnaha bulshada saameeyay laga ilaaliyo arrin kasta oo la xiriira amaanka ee si ula kac ah ama aan ula kac aheyn loo sameeyo ka ilaalinta arrimaha ama khataraha ka dhasha sida barnaamijyada CSO loo naqshadeeyo loona bixiyo. Inta ay ku guda jiraan howlahooda bulshooyinka dhexdooda, waxaa dhici karta in CSO-yada ay la kulmaan dhac-dooiyinkan hoose oo kale.


Hogaamiye bulsho oo lab ah ama shaqaale/mutadaw ac (qof si iskaa wax u qabso ku shaqeeya) kaasoo la shaqeynaya CSO uu ka dalbado qof dumar ah in ay galmo ku beddelayo cunto ama waxyaabo aan cunto aheyn ama in lagu daro gargaarka

Wiil ama gabar u socda iyo ka soo baxaya goob barnaamij CSO lagu qabanaayo ayaa xubna bulshada ka mid ah ku xadgudbeen ama dhibaateeyeen safarkooda dhexdiisa.

Wixii maclumaaad dheeraad ah, ka akhri afarta bog ee RSH ee “sida loo” ogaado Programming-ta Ammaanka leh.

ISKU DIYAARI:

Si aad u taageerto naqshadda amaanka ah iyo bixinta barnaamijyada waa in aad:



Magacowdaa howl-wadeen ilaalo oo aad siisaa iyada/ isaga shuruudaha tixraaca.

Siisaa dhammaan shaqaalah tababbar asaas ah oo ku saabsan ilaalinta.

Dhameystirtaa khariideynta adeegyada taageero ee maxalliga ah, aadna sameysaa qorshe tixraac leh.

Hubisaa in baaritaan kasta ay sameyn doonaan baarayaal tababbaran oo kaliya.


Hubisaa in ka badbaadayaasha ama dhibanayaasha uu taageero siiyo qof xirfad u leh arrinkaas.

ABUUR KALSOONI:

Xaqiji ka qeybgalka bulshada inta lagu guda jiro wareegga barnaamijka:

Khilaaf ka dib, bulshooyinka dhexdooda waxaa isbedel ku yimaadaa hogaanka, hababka taageerida bulshada, hey'adaha iyo jilayaasha ku howlan bulshada iyo khararaha iyo nooca xadgudubka iyo xadgudbayaasha. Abuurista kalsooni iyo si dhaw ula shaqeynta bulshooyinka waa furaha sameynta barnaamijyo amni leh.

bulshooyinka waxay awoodaan in ay:



aqoonsadaan qeybtee barnaamijka ka mid ah ka dhigto in ay dareemaan ammaan iyo qeybta ka dhigto in ay amni yari dareemaan.

sharraxaan waa maxay, sidee, goorma, xagee iyo qofkee ayay dareemaan in ay ku qanacsanyihiin in ay u soo sheegaan xadgudub uu geystay CSO.

BIXI SI AMNI LEH:

Ku soo kordhi barnaamijyo amni leh inta lagu guda jiro wareegga barnaamijka:

